Bundesministerium
Bildung

# Warqad xogeed oo loogu talagalay waalidiinta/mas'uuliyiinta oo la xiriirta mamnuucidda xijaabka (§ 43a ee Xeerka Dugsiga Austria (SchUG))

Waalidiinta iyo Mas'uuliyiinta sharafta leh,

Aad bay muhiim noogu tahay in dhammaan carruurta ay badbaado, amni, iyo aqbalaad ku dhex dareemaan dugsigeenna. Dugsiga waa inuu noqdaa meel ay carruurta si xor ah wax ugu baran karaan, ku horumarin karaan shakhsiyaddooda, kuna kobci karaan.

Sidaas darteed, waxaan warqaddan kuugu sheegaynaa qaab-dhismeedka sharciga ee loogu talagalay gabdhaha ka yar 14 sano ee dugsiyada Austria.

Laga bilaabo sannad-dugsiyeedka cusub ee 2026/27, sharci ayaa lagu dabaqi doonaa dhammaan ardayda dheddigga ah ee ka yar **14 sano** sharcigaas oo aan oggolaanayn in dugsiga lagu dhex xirto dharka madaxa lagu daboolo sida waafaqsan dhaqanka Islaamka, tusaale ahaan inta la joogo dhulka dugsiga iyo dhismaha dugsiga. Sharcigan ayaa dhaqan galaya iyadoon loo eegin in xijaabka loo xiran yahay sababo faashoon, dhaqameed, diimeed ama sababo kale.

**Waa muhiim in la ogaado:**

Dugsiga waa meel ammaan ah oo ay soo geli karaan oo keliya dadka haysta sabab ay halkaas ku joogaan (ardayda, macallimiinta, waalidiinta). Ardayda waxay ku jiraan bulsho waxbarasho oo go'an waxaana kormeera macallimiinta.

Dugsiga wuxuu waajib ku ah inuu hirgeliyo sharciyada khuseeya. Dugsiyada wax go’aan ah kuma lahan arrintan. Dugsiga kuma dhaqmo ra'yi shakhsiyeed, laakiin wuxuu ku dhaqmaa sharciga.

**Carruurta waa inay joogaan dugsiga:**

- iyagoo xor ka ah cadaadiska bulshada ama diinta,
- Waxay horumarin karaan aqoonsigooda markay gaaraan da’a ku habboon,
- waxayna wax ku baran karaan oo ay u kori karaan si siman oo aan kala sooc lahayn.

Mamnuucidda xijaabka waxay ujeedadeedu tahay ilaalinta carruurnimada waxaana loogu talagalay in lagaga hortago in carruurta lagu qasbo inay qaataan doorar diimeed inta ay yar yihiin. Badqabka ilmaha iyo horumarka garaadka ayaa had iyo jeer ah ahmiyadda ugu weyn

ee dugsiga. Sharciga wuxuu si cad kuugu waajibinayaa, adiga ka waalid ama mas'uul ahaan, inaad xaqiijiso in gabadhaada ay u hoggaansanto xeerarka sharciga ah.

Marka la joogo meel ka baxsan dhismayaasha ama xarumaha dugsiga, waalidiinta/mas'uuliyiinta ayaa go'aamiya in ilmahooda ay xirtaan xijaab iyo in kale.

Waxaan fahamsanahay in tani ay noqon karto arrin xasaasi ah. Sidaa darteed, wadahadal ixtiraam, faham, iyo taageero leh ayaa si gaar ah muhiim u ah. Hadafkeena waa inaan si wadajir ah u sheegno in xeerkani uu yahay waajib sharciyeed oo idin saaran ka waaliddiin/mas'uuliyiin ahaan iyo dugsigaba, iyadoo isla markaana ujeedadu tahay ilaalinta iyo horumarka caafimaadka leh ee carruurta.